

Tallaalka Corona



Muxuu yahay tallaalka Corona

Tallaalka Corona wuxuu kaa badbaadinaayaa fayruska-Corona. Waxaa tallaalka lagu siinayaa qaab cirbad oo garabka lagu mudo. Tallaalka ka dib ma xanuunsaneysid ama wax yar ayaa fayruska ku xanuunsan kartaa.

Maxaa jirkaaga gudahiisa ka dhacaaya

Tallaalka ayaa sababaaya inuu jirkaaga sameeyo difaac fayruska ah. Markaasoo jirkaaga uu aqoonsanaayo fayruska tallaalka ka dib. Markaasi jirkaaga dhaqso ayuu fayruska u dilaayaa. Adiga ma xanuunsaneysid ama xanuun aan badnayn ayaa yeelaney.

Weli lama oga inta uu tallaalka jirkaaga uu ka badbaadinaayo Corona.

Ma yahay mid amaan ah

Marka talaaladu diyaar noqdaan, waxa lagu tijaabiyay dad badan. Markaa waxa ansixiyay shirkadaha EMA iyo CBG. Tallaalka Pfizer/BioNTech waxa sidoo kale lagu tijaabiyay caruurta da'doodu tahay 5 sano iyo wixii ka wayn. Talaalkan sidoo kale waxa ansixiyay iyaga. Caruurta Da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 12 sano jir sidoo kale waxay qaadanayaan daawada.

Hada talaalada la isticmaalay iyo badqabkooda waa la maamulayaa.

Waxyaalaha uu keeni karo



Sida dhamaan talaalada kale ayaa xanuuno kala kulmi kartaa tallaalka ka dib. Taasi waxaa lagu magacaabaa waxyaalaha uu kugu keeni karo.

Waxaa tusaale ahaan aad yeelan kartaa:

- Xanuun meesha lagaa muday
- Madax xanuun
- Daal
- Murqo xanuun
- Xumad /qandho

Kuwani waa waxyeelo fudud oo ay reebaan. Sida badan wey jiraan haddana dhowr beri ka dib wey baaba'aan .

Ma jiraan waxyeelo daran badan oo lagu arkay. Laakiin u wac dhaqtarkaaga qoyska haddii aad xanuuno badan leedahay wiigaga talaalka ka dib.



Yaa qaadanaaya tallaalka ama la tallaalayaa

Waxaa Nederland ballan loo sameyn karaa qof walba laga bilaabo 12 jir. Taasi waxaa laga sameyn karaa internetka tooska ama telefoonka. Internetka tooska ayaa ballan ka sameyan kartaa: www.coronavaccinatie-afspraak.nl. Taleefoonka waxaa ballan ka sameysan kartaa nambarka: 0800 7070

Waxaa jira tallaalo noocyo kala duwan. Adiga ma dooran kartid nooca tallaalka aad rabto. Dhamaan tallaalka la isticmaalaayaa waa la soo tijaabiyey iyo waa la soo ansaxiyey.

Dadka uurka leh

Dumarka uurka leh wey badan tahay rajada iney Corona aad ugu xanuunsadaan. Sidaa awgeed talada waa: Qaado talaalka haddii aad uur leedahay ama aad rabto inaad uur bixiso. Taladan waxey ka timid dhaqaatiirta dumarka u qaabilsan, umuliasaha iyo dhaqaatiirta ilmaha.

Amaanka

Dhaqaatiirta iyo aqoonyahanada waxey sameeyeen baaritaan talaalka mudada uurka. Baaritaanada waxaa ka cadaaday:

- Tallaalka inuu amaan u yahay dumarka uurka leh
- Tallaalka waa amaan markaad rabto inaad uur qaado
- Tallaalka waa u amaan ilmaha uurka ku jiro
- Tallaalka wuu yareynaayaa rajada inaad aad ugu xanuunsato Corona
- Tallaalka waa amaan marka aad ilmaha naaska siineysid

Ma ka shakineysaa tallaalka? Kala hadal umulisada ama dhaqtarka dumarka.

Qaadashada talaalka - qaadasho dheeraad ah

Talaal qaadashada dheeraadka ah waxa la siin doonaa laga bilaabo Noofeembar 2021 waanay sii soconaysaa.

Talaal qaadashada dheeraadka ah waxay ku ilaalin doontaa in mudo ah. Waxay ka dhigaysaa jaaniska aad ku xanuunsan karto mid aad uyar.

Waxaad heli kartaa talaal qaadashada dheeraadka ah:

- Laga bilaabo 3 bilood kadib talaalkaagii ugu dambeeyay ama
- laga bilaabo 3 bilood kadib ka bogsashada Corona.

Goorma aadan is tallaaleynin

Dhaqtrkaaga qoyska wac haddii aad:

- hore xasaasiyad aad ka qaaday tallaalka aad qaadatay ka dib
- aad tallaalka 1aad ka dib aad xasaasiyad daran aad yeelatay

Waxaa fiican inaad tallaalka dib u dhigto oo aad ballan cusub sameysato haddii :

- haddii aad aad u jiran tahay maalinta talaalka
- aad leedahay xumad 38 darajo ama ka badan
- aad qabto corona
- aad leedahay calaamadaha badiyaa lagu arko Corona
- haddii aad baaritaan corona sameysey oo aadan weli ogayn natiijada
- haddii aad la xariirtay qof qaba corona

Tallaalka ka dib

Haddii aad tallaalka ka di baad xanuuno Corona isku aragto, markaa iska soo baar.

Tallaalka ka dib rajada inaad fayruska dad kale u gudbisoo waa ay yar tahay.

Laakiin tallalka ka dibna fayruska waad gudbin kartaa.

Tallaalka ka dib sii wad inaad tallooyinka guud ku dhqanto, sida dhaqida gacmaha iyo dariishada oo la furaa.

Su'aalaha

Miyaad dhib ku qabtaa talaalka oo aad jeclaan lahayd inaad ka hadasho?

Intaa kadib waxaad wacaysaa 088-7555777

Waxaad sidoo kale eegi kartaa wabsaaytka www.twijfeltelefoon.nl



Ma qabtaa su'aalo kale oo ku saabsan Corona fayruska:

La xariir **0800-1351**

Deze begrijpelijke informatie is gebaseerd op de adviezen van Rijksoverheid.nl en informatie van het CBG.

De informatie is getest met taalambassadeurs van Stichting ABC.

18 januari 2022 – versie 12